



Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay :

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Oktoobar 13, 2021-ka

Ku socota: Shaqaalaha ODDS iyo Hawl wadaagayaasha(Hay'adaha Maamulka Kiiska iyo Daryeel Bixiyayaasha, fadlan farriintan la wadaaga kuwa sida tooska ah ula shaqeeya dadka qaba I/DD iyo qoysaskooda.)

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Xubnaha oo looga baahan yahay Guddiga Xuquuqda Aadanaha

Ma jeceshahay waxyaabo ku saabsan xuquuqda dadka qaba naafanimada maskaxda iyo korriinka (I/DD)? Ma jeclaan lahayd in aad u doodo xuquuqdooda iyo wanaajinta adeegyada ay helaan?

Dhowr boosaska guddiga oo ku saabsan Guddiga Xuquuqda Aadanaha ayaa loo baahan yahay in la buuxiyo. Guddiga — oo ah natiijo ka dhalatay [Sharciga Senate-ka 493](#) — wuxuu ilaaliyaa sharafta iyo xuquuqda aadanaha ee aasaasiga ee dadka reer Oregon qaba I/DD, wuxuu cod siiyaa baahiyahooda wuxuuna uu adeegaa oo yahay ilo muhiim ah oo ay leeyihiin.

Sagaalka xubnood ee ka tirsan Guddiga ayaa u baahan in ay matalaan dano iyo doorar kala duwan ee nolosha dadka qaba I/DD. Boosaska loogu talagalay dadka soo socda ayaa furan:

- qof walaalo la yahay ama xubinta qoyska ka tirsan ee aan waalidka ahayn ee qof qaba I/DD
- wakiil ka socda urur u dooda naafanimada

Haddii aad ku habboon tahay mid ka mid ah doorarkani [fadlan ka codso dhanka internet-ka](#) muddo aan ka dambeyn Noofambar 15, 2021.

Haddii aad taqaan qof ku habboon Guddiga, gaar ahaan qof ay walaalo yihiin qof qaba I/DD, fadlan farriintan la wadaag isaga oo ku dhiirigeli in uu codsado.

Haddii aad hore u codsatay boos, waa in aad [dib u codsataa](#) muddo aan ka dambeyn Noofambar 15, 2021.

Guddigu waxay kulantaa bil kasta muddo laba saacadood ah kaasi oo ah maalmaha Isniinta ee saddexaad. Kulamadani subaxnimo maantu waa dhanka internet-ka waxayna sii ahaan doonaan kuwo sii socda ka dib cudurka baahsan si loogu oggolaado kala duwanaanshaha juqraafi ee xubnaha. Guddoomiyaha gobolka ayaa magacawda xubnaha guddiga oo ah muddo sadex-sanno ah.

Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan nidaamka codsiga, fadlan Maamulaha Ballamaha Fulinta Shawneen O'Brien-Lee kala xiriir shawneen.obrien-lee@oregon.gov.

Waad ku mahadsantihin in aad naga caawiso sii gudbinta hadalka!

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa <http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon

kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.